CESDM
CENTER FOR EXCELLENCE IN SUPPORTED DECISION MAKING

Volunteers of America®
MINNESOTA AND WISCONSIN

# Joojinta ama Wax ka Beddelidda Mas'uulka qofka ee ay Maxkamaddu Magacowday

## Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo

Mas'uulka qofka ee ay Maxkamaddu Magacowday waa la soo gunaanadi karaa (la joojin karaa) ama waa la beddeli karaa (wax ayaa laga beddeli karaa). Mas'uulka sharciyeed ee qofka loo doortay waxaa badanaa loo sameeyaa qof qaba naafo garasho, naafo dhimir, ama naafo maskaxeed, sababtoo ah waxaa jiray walaac laga qabay badbaadadiisa iyo fayo-qabkiisa ama awooddiisa uu ugu gaari karo go'aanno daboolaya baahiyihiisa aasaasiga ah.

Waxaa jira sababo badan oo loo sameeyo in qofka loo doorto qof masuul ka noqdo. Si kastaba ha ahaatee, tani **macnaheedu maahan in qofkaas waligiis masuul laga ahaado ama aanan la beddelin. Waa muhiim in si joogto ah looga fikiro in mas'uuliyadda wali loo baahan yahay ama weli ku habboon tahay qaabka ay tahay hadda.**

## Muddo inte dhan ayay qaadataa Masuuliyadda?

Dadka ka yar 30 jir, mas'uulnimada la bilaabay wixii ka danbeeyay Agoosto 2020 waxay **si toos ah u dhammaanaysaa 72 bilood (6 sano) kadib**, haddii aan la gudbin codsi cusub oo lagu dalbanayo in laguu magaaco masuul kale.

Haddii uusan garsoore xaddidin muddada ballanta, **masuuliyada kale waxay sii jiri doontaa ilaa:**

- Qofka ka dhimanayo.
- Maxkamaddu **ka soo gunaanadayso ama wax ka beddelayso** masuulka qofka lagu sameeyay codsi iyo dhageysi maxkamadeed oo sheegaysa aanay mar dambe loo baahnayn.

## Masuul ka noqoshada qofka ma la soo gunaanadi kara ama wax ma laga beddeli karaa?

**Haa.** Xitaa haddii naafonimada qofka aysan soo fiicnaanin, weli waa suurtagal in:

- Gabi ahaan la joojiyo masuulka qofka loo dooray.
- Qofka dib loogu soo celiyo qaar ka mid ah xuquuqdiisa go'aan-qaadashada, iyadoo weli la sii hayo heerar ka mid ah ilaalinta hadda jira, iyadoo wax laga beddelayo awoodaha la siiyay qofka masuulka loo dooray.

## Maxaa loo tixgelinayaa in wax laga beddelo masuulka qofka loo dooray?

- **Qofku wuxuu hadda uga furfuran yahay inuu aqbalo caawimaad** dhanka go'aan-qaadashada ama diyaarinta daryeelka iyo adeegyada, marka loo eego sidii uu ahaa markii masuulka loo dooray.
- Nidaamyada taageerada ama adeegyada aan hore loo heli karin ayaa laga yaabaa inay hadda jiri karaan ama ay ku habboon yihiin.
- Waxaa hadda wax badan ka ognahay taageerada la heli karo si loo hubiyo in qofku baahiyihiisa la daboolo isagoo dhawraya xuquuqihiisa go'aan-qaadashada.

**Intaan soo gunaanadin ama aadan wax ka beddelin masuulka qofka loo dooray, ka fikir:**

- Qofku ma leeyahay (ama ma ka qayb qaadan karaa aqoonsiga iyo samaynta) kooxo taageero, oo ay ku jiraan maareeyayaasha kiiska, kuwaas oo caawin kara marka uu u baahdo?
- Qofka ma u furan yahay inuu aqbalo taageerada uu ka helayo kooxdiisa siisa taageerada?
- Maxaa uu masuulka loo doortay qofka u qabtaa hadda?
    - Miyay ka sii caawin lahaayeen qofka goobahan haddii aysan ahaan lahayn masuulka loo dooray qofka?
    - Qof kale ma caawin karaa goobahan?
- Ma jiraan siyaabo kale oo lagu taageeri karo qofka iyada oo aan loo baahnayn masuul qofka loo dooray?

# Joojinta ama Wax ka Beddelidda Mas'uulka qofka ee ay Maxkamaddu Magacowday

SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO

## Goorma ayay tahay waqti fiican in dib loo eego in masuulka qofka loo dooray uu weli lagama maarmaan yahay iyo in kale?

- Marka la dhammeeyo dukumentiyada warbixinta sanadlaha ah.
- Marka rabitaanka qofka inuu aqbalo caawimaadda uu isbeddelo.
- Marka taageero ama adeegya cusub la heli karo.
- Marka qofka uu codsado in wax laga beddelo ama la soo gunaanado.

## Naafanimada qofka ama xaaladda caafimaad isma beddelin — miyaanay weli qofka u baahnayn masuul qofka loo dooray?

**Daruuri maahan.** Baahida loo qabo in qof loo dooro masuul kuma salaysna oo keliya heerka uu qofku wax u qabsan karo, naafanimadiisa, ama cudurka la arkay inuu qabo. Waxay ku salaysan tahay in **baahiyahooda lagu dabooli karo habab xaddidaadkoodu yar yahay.** Taasi waa sababta habraacan loogu yeedho Soo Celinta Xuquuqda ama Joojinta Masuulka Qofka loo dooray, halkii loogu yeedhi lahaa Soo Celinta Awoodda.

Markii ugu horreysay ee la sameeyay masuulka la dooray, maxkamaddu waxay u badan tahay inay u baahnayd caddayn muujinaysa:

- In qaabab kale oo taageero lagu helayo la isku dayay.
- Muddada la tijaabiyay.
- Sababta ay u shaqayn waayeen.

**Haddii ay jiraan siyaabo fudud oo lagu dabooli karo baahiyaha qofka oo qofku ku raacsan yahay, waxaa laga yaabaa in aan loo baahnayn masuulka la doortay.**

## Maxay yihiin qaar ka mid ah calaamadaha ku tusinaya in ay tahay inaan ka fikirno gunaanadka ama wax ka beddelidda masuulka la dooray?

**Isbeddellada dhawaan lagu sameeyay Go'aan qaadashada qofka laga taageeray waxay aqoonsanayaan in dadku aysan had iyo jeer u baahnayn qofka loo dooray inuu masuul ka ahaado.** Ka fiirso wixii isbeddel ah ee dhacay tan iyo markii la sameeyay masuula laguu dooray si loo go'aamiyo in weli loo baahan yahay si loo daboolo baahiyaha qofka:

- Qofku wuxuu helay ama dib u helay xirfado.
- Waxaa la heli karaa tignoolajiyo cusub (sida GPS si looga hortago in qofku uu lumo, iyo alaarmiga taleefanka oo xusuusiya inuu qaato daawooyinkiisa).
- Qofku wuxuu hadda aad ugu furfuran yahay aqabalaada inuu ka helo caawimaad qoyska, asxaabta, ama bulshada.
- Adeegyo ama taageerooyin cusub ayaa la heli karaa hadda. Sidoo kale ka fikir siyaabo kale oo qofku ku heli karo taageero haddii masuuliyada qofka loo dooray ay dhammaato:
- Wakiilka daryeelka caafimaadka wuxuu gacan ka geysan karaa sharxidda arrimaha caafimaadka iyo go'aan ka gaarista daryeelka caafimaadka.
- Taageerada laga helo qoyska, saaxiibbada, ama bulshada.

**Weydii:** *Taageerooyin noocee ah ayaa la heli karaa si wax looga qabto baahiyaha qofka haddii masuulka qofka loo dooray la joojiyo?* **Taageerooyinkan ayaa laga yaabaa inay horey u jireen, taasoo ka iyo dhigaysa mas'uuliyada qofka loo dooray mid aan loo baahnayn.**

## Ma u baahanahay dukumentiyo ama taageero laga helo dhakhtar ama qof kale oo bixiya daryeel caafimaad?

**Maya.** Uma **baahnid** cadayn caafimaad in qofka soo fiicnaaday ama soo kabtay. Waxaad u baahan tahay oo keliya inaad caddeyso:

- In qofka uusan u baahnayn heerka ilaalinta ee ay bixiso mas'uulka qofka loo dooray.
- In baahidooda aan lagu dabooli karin qaab kale.

# Joojinta ama Wax ka Beddelidda Mas'uulka qofka ee ay Maxkamaddu Magacowday

SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO

Sharciga Minnesota uma baahna dukumentiyo gaar ah, marka laga reebo Codsi lagu Joojinayo (ama wax looga beddelayo) Masuulka qofka loo dooray iyo foomamka kale ee maxkamadda ee la xiriira hanaanka maxkamadda. Sharaxaado dheeraad ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo si loogu wargeliyo dadka kale waxa sharcigu u baahan yahay. Mararka qaar, garsoorayaashu wali way codsan karaan dukumentiyo; kiiskan, hadallo taageero ah oo ka imanaya xirfadlayaal ayaa gacan ka geysan kara xoojinta kiiska.

## Sideen ugu diyaar garoobnaa dhageysiga maxkamadda?

Isu diyaari inaad maxkamadda u sheegto:

- Waxa isbeddelay tan iyo markii la bilaabay masuulka qofka loo dooray.
- Qalabka sharciyeed ee la tijaabiyey iyo kuwa la isticmaali doono haddii mas'uulnimada sharciyeed ee daryeelka qofka la joojiyo.
    - Tusaale ahaan, marka masuulka qofka loo dooray dhammaato, qofku wuxuu dib u helayaa xuquuqdiisa sharciyeed ee uu ku magacaaban karo qof uga gaara go'aannada daryeelkiisa caafimaad, ama uu ku saxiixi karo oggolaanshaha bixinta macluumaadka si loogu oggolaado kooxdiisa taageerada inay la xiriiraan xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka, shaqaalaha adeegyada bulshada, dadka siiya adeegyada, iyo dadka kale ee ka caawinaya go'aan-qaadashada.
- Waa kuwee dadka taageerada shakhsiyeed iyo/ama taageerada xirfadeed bixiya ee diyaar u ah inay hubiyaan in qofku helo daryeelka iyo adeegyada uu u baahan yahay.
- Sida ay u adeegsan doonaan go'aan-qaadasho la taageeray iyo habab kale marka ay u baahan yihiin caawimo dheeraad ah si ay u fahmaan xaaladdooda ugana gaaraan go'aanno aysan kaligood qaadan karin.

Haddalada ay bixiyeen shaqaalooyin bulsho, dhakhaatiir, ama xirfadley kale oo caafimaad oo taageeraya in la soo gunaanado ama wax laga beddelo masuulka qofka loo dooray **ma haboona.,** laakiin wuxuu xoojin karaa kiiskaaga.

## Sideen u diyaar garownaa? Nolosha qofka miyaanay jahawareer gelayn haddii uu si lama filaan ah u waayo masuulka?

**Joojinta masuulka qofka loo doory kama dhigna in la joojinayo taageerada.** Tani waxay ka dhigan tahay in qofku heli doono taageerada uu rabo una baahan yahay si looga caawiyo go'aan-qaadashada iyo/ama loogu xiro daryeelka iyo adeegyada uu u baahan yahay, isagoo taageero ka helaya qoyskiisa, saaxiibbadiis, bulshadiisa, iyo xirfadlayaal, halkii uu ka heli lahaa mas'uulka sharciyeed ee ay maxkamaddu u magacawday. Iyadoo lagu salaynayo baahiyaha qofka, waxa uu doorbidayo, iyo awooddiisa sharci ee uu heshiisyo ku geli karo, qofku wuxuu dooran karaa inuu:

- Inuu dhamaystiro Tilmaamaha Daryeelka Caafimaadka.
- Saxiixo oggolaanshaha la wadaagida macluumaadka adeeg bixiyeyaashiisa kala duwan, ama inuu taageerayaashiisu la socdaan marka uu tegayo ballamaha caafimaadka, adeegyada bulshada, waxbarashada gaarka ah, ama kulamo kale.
- Tuso nidaamyada taageerada isaga oo buuxinaya Heshiiska Go'aan-qaadashada Laga Caawiyo.
- **Ogsoonoow:** Haddii uu leeyahay wakiil loo magacaabay inuu maamulo lacagaha macaashka ee uu ka helo Caymiska Sooshiyaal Sekiyuuritiga, xiriirkaas wuu sii soconayaa xitaa haddii maasuulka qofla loo dooray la joojiyo, maadaama magacaabista wakiilkaas ay samaysay Maamulka Sooshiyaal Sekiyuuritiga.

Waxa ugu muhiimsan, **qofku waa inuu si firfircoon uga qaybqaataa wadahadallada qorsheynta.**

## Ka warran haddii masuulka qofka loo dooray ama dad kale ay aaminsan yihiin in masuulka wali lagama maarmaan yahay?

Waa wax caadi ah in dadku ay walwalaan ama aysan hubin joojinta masuulka qofka loo dooray. Waxaa laga yaabaa inay ku caawiso inaad u sharaxdo qofka walaacsan:

- In qofka ku jira masuulka qofka loo dooray uu fahansan yahay inuu weli u baahan yahay oo uu doonayo caawimo, lamid midii uu masuulka horey u siin jiray.
- Taageerooyinka qofka uu haysan doono haddii masuulka la dooray uu soo dhamaado.

# Joojinta ama Wax ka Beddelidda Mas'uulka qofka ee ay Maxkamaddu Magacowday

SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO

Ugu dambayn, maxkamadda ayaa gaadha go'aanka kama dambaysta ah ee ku saabsan in la joojiyo iyo in aan la joojin masuulka qofka loo dooray. Sidaa darteed, qofka iyo dadka taageera waxay sii wadi karaan codsigooda xataa haddii ay jiraan dad kale oo ka soo horjeeda. Codsiga iyo dhegeysiga maxkamadda, qofka ama taageerayaashiisu waa inay diyaar u yihiin inay soo bandhigaan sababaha loo joojinayo masuulka la doortay iyo sida uu qofku u heli doono taageero mustaqbalka.

Haddii diidmada masuulka la doortay ama dadka kale ay aad ugu badan tahay inay sababto in codsiga lagu joojinayo la diido, tixgeli xeelado hal-abuur leh:

- Tixgeli inaad codsato in la magacaabo masuulka lagu beddelaya kan hadda jira, halkii aad ka codsan lahayd in la joojiyo maamulka hantida ee maxkamadu magacawdo. In la helo qof lagu kalsoon yahay oo loo magacaabo masuulka beddelaya waxay yareyn kartaa diidmada maamulaha hadda haya maamulka Masuulka iyo weliba dadka kale ee arrintan ka walaacsan. Qofka lagu beddelaya iyo qofka hadda shaqada haya ayaa markaa ka wada shaqayn kara joojinada mustaqbalka.
- Ku bilow inaad maxkamadda ka codsato inay wax ka beddesho masuulka halkii laga codsan lahaa in la soo afjaro, si loo muujiyo in qofku awood u leeyahay inuu maareeyo qaar ka mid ah mas'uuliyadihiisa isaga oo aan u baahnayn awoodda maamulaha ay maxkamaddu u magacawday dhammaan arrimaha.
- Qofka, masuulkiisa loo dooray, iyo dadka kale ee taageera waxay ka wada shaqayn karaan horumarinta xirfadaha qofka iyadoo la ilaalinayo badbaadada uu bixiyo nidaamka masuuliyada loo dooray. Marka dambe, waxay maxkamadda u gudbin karaan codsi lagu joojinayo masuuliyada laguna beddelayo habab ka xadidaad yar.

## Wixii Macluumaad Dheeraad ah

Wixii talo shaqsiyeed ah oo ku saabsan xaaladdaada, la xiriir:

Laynka Macluumaadka Mas'uulnimada Maxkamadeed:

**952-945-4174** ama **844-333-1748**

**cesdm@voamn.org**

Booqo websaydkeena wixii macluumaad dheeraad ah:

**www.voamnwi.org/cesdm ama iskaan mari QR koodhka**

*Diyaarinta dukumeentigan waxaa lagu taageeray maalgelin ay bixisay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (MN), Qaybta Adeegyada Waayeelka iyo Dadka Naafada ah.*